

Hanuunin loogu talagalay Beer-Khudaarta Bulshada Minnesota

Qoraalkani wuxuu bixinayaa soojeedinno hawlgaal loogu talagalay Beer-khudaarta Bulshada Minnesota inay hirgeliyaan si ay ugu sii furnaadaan hoostiisa Amarkii Fulinta Guddoomiye Walz ee 20-04 ee xiray makhaayadaha, baararka iyo meheradaha kale ee dadku ku kulmaan. Beer-khudaarta Bulshada Minnesota ayaa laga dhaafay amarkan illaa iyo inta aysan oggolaan ku cunidda cuntada isla goobta (oo ay ku jirto siinta cunto yar dhadhamada sambalka ah). iyo inay hirgaliyaan habdhaqannada kala fogaynta bulsheed ee ah beeraha-khudaarta gudaheeda.


Tilmaamaha Beer-khudaarta Bulshada Loogu Talagalay Isticmaalka Dadwaynaha

- Dhammaan ka-qaybgalayaashu waa in loo wargaliyaa tilmaamahan ka soo jeeda Isuduwaha Beerta-khudaarta kahor isticmaalka Beer-khudaarta Bulshada.
- Shakhsiyaadku waa inaysan soogalin beero-yaryarta bulshada haddii ay leeyihiin astaamaha COVID-19. Astaamahan waxa ka mid ah qandho, qufacid, neefsashada oo gaabata.
- Shakhsiyaadka waa inay u jiraan ugu yaraan 6 fiit dadka kale marka la dhex joogo beerta-khudaarta.
- Calaamado muujinaya ujeedooyinka beer-khudaarta waa in lagu dhejiyaa irrid kasta oo laga soogalo beer-khudaarta iyo meelaha u dhow meelaha la wadaago (fiiri tusaalaha sawirka).
- Ka fikir inaad u dejiso xadayn tirada dadka loo-oggolaanyo beerta-khudaarta gudaheeda isla hal wakhti, iyo/ama u samee kormeerayaal beerta-khudaarta oo awood u leh, inay kormeeraan qulqulka socodka dadka ee gudaha beerta-khudaarta.
- Ka fikir inaad yareyso tirada qaybaha beeraha ka jira beer-khudaarta si aad ugu samayso meelo bannaan dhexdooda qaybaha beeraha.
- Haku qaban maalmaha shaqada bulshada, xusitaannada ama munaasabadaha kale ee dadka iskugu keena beer-khudaarta bulshada inta lagu jiro wakhtigan.
- Haddii miisaska la wadaago ama weelka deeqda lagu rido la dhigo goobta, hubi in la heli karo qalabyo gacmo-meyrasho oo ay ogyihiin inay gacmaha iska meyrain intayna isticmaalin.
- Ka fikir inaad dhigto meel gacmaha lagu dhaqdo ama jermiska lagaga dilo goobta beerta khudaarta, fiiri Barnaamijka Badbaadada Cuntada Beerta Taal ee Fidinta Beeraha Minnesota (<https://sites.google.com/umn.edu/food-safety-fact-sheets/home>) for a [portable design option](#).
- Waa inaan lagu bixin goobaha qalabyo loo isticmaalkooda la wadaago haddii ay jirto fursad jermis looga dilo aaladda, ama lagu mayroo ama ama gacmaha la nadiifiyo kahor inta ka dambaysa isticmaalkaba.
- Ka fikir inaad abaabusho tabarucayaal nadiifiya oo jermiska ka dila sheyada la wadaago iyo meela dushooda sida muusqulaha kolba meel la geeyo, qasabdaha iy tuubbooyinka waraabinta, handaraafyada ganjeellada laga soogalo, iwm. maalin kasta ahaan.
 - » Soosaarrada Jermiska-Dila ee Ka Diiwangashan EPA looguna talagalay U Isticmaalka Kahortagga Novel Coronavirus SARS-CoV-2, oo sabab COVID-19 (<https://www.americanchemistry.com/Novel-Coronavirus-Fighting-Products-List.pdf>)
 - » Agabyada lagula dagaallmo cudurka Novel Coronavirus (COVID-19) ee - American Chemistry Council Center for Biocide Chemistries (Xarunta Guddiga Kemistiriga Mareykanka ee Soosaar Kiimkeedka Dilaa-Cayayaanka) (<https://www.americanchemistry.com/Novel-Coronavirus-Fighting-Products-List.pdf>)


- » Raac tilmaamaha soosaaraha ee dhammaan waxyaabaha nadiifinta iyo jeermiska keena (tusaale ahaan, xooggeeda, hab u isticmaalka, waqtiga taabashada, iyo adeegsiga qalabka badbaadada shaqsiyadeed, hana isugu darin iyaga!)
- » Uma wada habboona dhammaan wershada soosaarridu nadiifinta meela ay cuntadu taabanayso dushooda.
- HA U FIDIN wax adeeg cunto ama cabbitaan ama sambal cunto ah ama cabbitaan oo lagu isticmaalo goobta – ha noqoto iib ama lacag la'aan mid u ah dadweynaha.

Taxaddarada muhiimka ah Beerta-Khudaarta Bulshada ee COVID-19

1) Waa inn laga fogaado dadka kale masaafu ah 6 ft



2) Gacmaha ku nadiifi saabuun iyo biyo kahor iyo kaddib isticmaalidda qalabyada la wadaago



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19 iyo kahortagga cudurka, booqo <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/prevent-getting-sick/prevention-H.pdf>